



KU DHAQAN XAFIIS D.  
**Faafin Rasmi ah**

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad

Mogadishu, 1 Febrayo 1975

L. 2

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

**KOBNIIN  
BOGGA KOWAAD  
SHARCI**

SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974 — *Ratification of  
Concentration.*

Bog. 63

SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974 — *Meel-marin He-  
shiis.*

» 64

SHARCI L. 11, Tr. 15 Jenayo 1975 — *Meel-marin Heshiis  
Ganacsi iyo dhaqaale oo dhexmaray J. D. S. iyo Imaa-  
raadka Carabta ee Midooabay.*

» 65

SHARCI L. 12, Tr. 15 Jenayo 1975 — *Meel-marin Heshiis  
dhexmaray J. D. S. iyo Jamhuuriyadda Dimuqoraadiga  
ee Dadka Yaman.*

» 66

SHARCI L. 13, Tr. 24 Jenayo 1975 — *Wareejinta Waka-  
ladda Gaadiidka Badda.*

» 67

**BOGGA LABAAD**

**XEER**

XEER WASAARADDA ARRIMAHAA GUDAHA, 14 Jenayo  
1975, L. 20 — *Magacaabid Kacaanka Degmada Garba-  
haarey Qaybta Wakiilada Beesha.*

» 68

- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Jenayo 1975, L. 21 — *Dhul Dawladeed la siiyay Maxamuud Moxamed Cisman ku yaal Muqdisho Jidka Maxamuud Harbi (ex Via Antonio Cecchi).* Bog. 70
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Jenayo 1975; L. 22 — *Dhul Dawladed loona geliyay (Libera disponibilità) Jaalle Cosman Cumar Ibrahim.* » 72
- 

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYNI, ISGAARSHN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

- MAXKAAMDDA GOBOLKA BANADIR, 25 Jenayo 1975 — *Dhumid Jeegga L. 13465, Sh. So. 1.000, uu leeyahay Faarax Faahiye Faarax.* (13) Bog. 73
- BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED, 16 Jenayo 1975 — *Heerka Sarriiska Lacagta Qalaad.* (14) » 73
- BOLIMOG 20 Jenayo 1975 — *Ka soo guurinta Xisaabaadka faa'iidaha iyo khasaaraha ku Tacalluqaan Sannadka 1973-1974 30ka Juuniyo 1974.* (15) » 74
- \* BOLIMOG 20 Jenayo 1975 — *Estratto del conto profitti e perdite Esercizio 1973-1974, 30 Giugno 1974.* (15) » 75
- WAKAALADDA MARMARKA IWM. (I.S.M.A. - S.p.A.) 20 Jenayo 1975 — *Ogeysiis Shir.* (16) » 75
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR. (17) » 76
-

**BOGGA KOOWAAD  
SHARCI**

SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974.

Ratification of Concenction.

**THE PRESIDENT  
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL**

HAVIING SEEN The first and Second Charters of the October Revolution;

TAKING NOTE Of the approval of the Supreme Revolutionary Council and Council of Secretaries;

**PROMULGATES**

The following Law:

**Article 1**

*Ratification of Convention*

The International Convention on the Suppression and Punishment of the Crime of Apartheid signed in New York by the Permanent Representative of the Somali Democratic Republic to New York on 2nd August, 1974 is hereby ratified.

**Article 2**

*Legal validity*

The Convention shall have the force of law in the Somali Democratic Republic and shall constitute an integral part of the laws of the Somali Democratic Republic.

**Article 3**

*Entry into Force*

This law shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 16 Disember 1974.

*Jaalle Major General Momaxed Siad Barre  
PRESIDENT*

SHARCI L. 10, Tr. 16 Disembere 1974.

Meel marin Heshiis.

### GUDDOONSHAHAA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaahidii koowaad iyo ti labaad ee Kacaanka  
21 Oktoobar 1969;

#### WUXUU SOO SAARAYAA

Shariga soo socda:

#### Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyey Heshiiska ka dhixeyya Qaruumaha, kuna  
saabsan in la baaba'sho lana ciqaabo Midab Gumeysiga (Apartheid)  
taaso ay Dawladda Soomaaliyeed ay saxiixday bishii Agisto 2di 1974.

#### Qodobka 2aad

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaan sharci,  
waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada lagaga dhaqmo Dalka Soo-  
maaliyeed.

#### Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galyaa isla marka la soo saxiixo waxaana  
lagu saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 16 Desembere 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 11, Tr. 16 Jenayo 1975.

Meelmarin Heshiis ganaci yo dhaqaale oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Imaaraadka Carabta ee Midoobay.

### GUDDOONSHAHAA

#### GOLAJA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Imaaraadka Carabta ee Midoobay ee la saxiixay 21kii Sebtember 1974;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo Iskaashi xagga Dhaqaalaha ee dhexmaro labada dal gaar ahaanna horumarinta Ganaci iyo Dhaqaale ee labada dal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay G.S.K. iyo Xoghayayaasha lamb. XGX-19-257-74 ee 26kii Diisambar 1974;

#### WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Heshiiska la kala saxiixday 21kii Sebtember 1974, kuna saabsanaa Iskaashi xagga dhaqaalaha iyo Ganacsiga ka dheeyaa Soomaaliya iyo Imaaraadka Carabta.

Heshiisku wuxuu yeelanaya astaan Sharci wuxuuna ka mid noqonaya Sharciyada u yaal Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 26kii Diisambar 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdishu, 15 Jenayo 1975.

SHARCI L. 12, Tr. 15 Jenayo 1975.

Meelmarin Heshiis gaar (Special Protocol) oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee dadka Yaman.

### GUDDOONSHAHAA

#### GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan labaad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Dadka Yaman ee la soxiixay 28kii Agoosto 1974;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo horumarinta ganacsiga ee labada Dal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go' aankii ka soo baxay G.S.K. iyo Xoghayayaasha Lambar. XGX-19-256-74 ee 26kii Diisembar 1974;

#### WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Heshiiska la kala saxiiday 28kii Agoosto 1974, kuna saabsanaa Horumarinta Ganacsiga ee Soomaaliya iyo Jamhuuriadda Dimoqraadiga ee Dadka Yaman.

Heshiisku wuxuu yeelanaya astaan Sharci wuxuuna ka mid noqonaya Sharyada u yaal Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aadd

Sharcigani wuxuu dhaqan gelaya 26kii Diisambar 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdishu, 15 Jenayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

GUDDOONSHAHAA

SOOMAALI CARD NO. 1451 ANXIA

SHARCI L. 13, Tr. 24 Jenayo 1975.

Wareejinta Waëaaladda Gaadiidka Badda.

**GUNDOONSHAH  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGOO ARKAY Xaanshida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;  
ISAGOO ARKAY Heshiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Carabta ee Liibya 4tii September, 1972;

ISAGOO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 59 ee 20kii Sebtember, 1972;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida weyn ee loo qabo Horumarinta Gaadiidka Badda;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Gołaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

**WUXUU XEERAYAA**

Sharciga soo' socda:

**Qodobka 1aad**

Marka laga bilaabo 21-5-1974 Wakaaladda Gaadiidka Badda laguna dhisay Sharciga lamb. 59 ee 20kii Sebtember, 1972, kana mid. ahaan jirtay Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda waa la baab'yey.

**Qodobka 2aad**

Hantida iyo qaanta Wakaaladda Gaadiidka Badda ee Qoddobka sare lagu baab'yey, waxaa lagu wareejiyey Sharikadda Gaadiidka Badda laga bilaabo 21-5-1974 (National Shipping Line).

**Qodobka 3aad**

Hantida iyo qaanta Wakaaladda waxaa loo tixgelinayaa gundhig-gana u noqonayaan saamiga (Share) Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ay ku darsatay Sharikadda Qodobka 2aad ku xusan.

**Qodobka 4aad**

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 1da Agosto, 1974 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdishu, 24 Jenayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*  
**GUNDOONSHAH  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

## **BOGGA LABAAD**

### **XEER**

#### **XEER WASAARADDA ARRIMAH A GUDAH A**

Tr. 14 Jenayo 1975, L. 20.

Magacaabid Guddiga Kacaanka Degmada Garbahaarey Qaybta Wakiillada Beesha.

#### **WASAARADDA ARRIMAH A GUDAH A**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1d iyo tan 2d ee Kacaanka 21ka Ok-tooba 1969ka;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 1972, lagu naadiyey faafinta rasmiga ah ee 21-9-1972, kuna saabsan maamulka Dowladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka lambarkiisu yahay 102 ee 26-9-1973 ee Madaweynaha G.S.K. kuna saabsan dhismo Gobol cusub;

ISAGOO OQASDAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wakiillada Beesha ee Guddiga Kacaanka Degmada Carbahaarrey, nagaalo madaxda Gobolka Gado, iyadoo la waafajinayo qodobka 10d lambarkiisa 3d, xarafka (c) ee sharciga kor ku tilmaamaan;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo;

#### **WUXUU GOOYEE Y**

Qodobka 1aad

Dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan-yahiin waxaa loo maga-

caabay inay noqdaan Idaarda Guddiga Kacaanka Degmada Garbahaarrey  
qaybta Wakiillada Beesha:

1. Jaalle Maxamed Aadan Cabdi;
2. » Sheekh Busuri Sheekh Qaasim;
3. » Xasan Gargaar Cusmaan;
4. » Sheekh Aadan Mataan Yacquub;
5. » Cusmaan Cigaal Cali;
6. » Xasan Xirsi Faarax;
7. » Macallim Cabdi Maxamed Duqow;
8. » Sheekh Cali Xasan Daahir;
9. » Xabiiba Xaashi Geelle;
10. » Buulle Shaaciye Cali;
11. » Sheekh Cabdi Yuusuf;
12. » Cabdullahi Cartan Nuur;
13. » Moxamed Ciise Samantar;
14. » Sheekh Maxamed Sahal;
15. » Moxamed Cabdille Moxamed;
16. » Sheekh Cabdi Muxumed;
17. » Sheekh Cismaan Moxamed Cilmi.

Qodobka 2aad

*Dhaqan gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelaya ka bilaabanta 20-10-1974. waana  
in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdishu, 14 Jenayo 1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. G. Jaamac Maxamed Qaalib*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

*Diiwaanka lamb. 1, bogga 19.*

*Muqdishu, 18 Jenayo 1975.*

*Hantidhowraha Guud:*

*G. Dhewe CABDILLAHI WARSAME NUUR*

## XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 15 Jenayo 1975, L. 21.

Dhul Dowlaadeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Dr. Moxamuud Moxamed Cismaan, èu yaal Muqdishu, Jidëa Moxamuud Harbi (ex Via Antonio Cecchi).

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Xaashadii Koowad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer L. 144 soona baxday 23 Maajo 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensatay Xaawa Cismaan Faarax taarikhdu markay ahayd 21-6-1951 kuna weydiisatay dhismo, cad dhul Dowlaadeed, ku yaal Muqdishu Jidka Moxamuud Xarbi kuna dhacaaya qaybta III Sub-Centrale;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, a weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 1-5 soona baxday 10-5-1962, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.4105, kuna saabsan dhismo dhangaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 309<sup>aad</sup> taarikhdu markay ahayd 22 Abrile 1963;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 9696 taas oo boddoshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 4105 laguna aqoonsaday fadhigii 11aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 22 Agosto 1972, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 16403 oo 2 Oktoobar 1963 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaawa Cismaan Faarax uu bixisay lacag dhan Sh. So. 1.872, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 312, loona tiriyay Xaawa Cismaan Faarax sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 10 Oktoobar 1963;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka saga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhis-maha iyo Dhulka, taarkhdeeduna ahayd 12-11-1974 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dow-ladda Hoose ee Xamar lamb. 9696 ee 21 Agosto 1972 laguna haqiqiyay sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) dagga-naashada guriga ku dhisan Xamar Jidka Moxamuud Harbi laguna siiyay xashida lamb. 9818 ee 26 Agosto 1972 oo Dawladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal dardaaran ah lamb. 354, taarikhdeeduna ahayd 23 Maarsa 1965, lagu diiwaan goliyay Maxkamadda Dégma-da Xamar, caddeynta Garsoore Sheekh Xusen Sheekh Abubaker taas oo Xaawa Cismaan Faarax kuna wareejisay kuna hibeeysay Dr. Moxamuud Moxamed Cisman wax allale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah, ka dhisan daar cusub, Jidka Moxamuud Harbi (Ex Antonio Cecchi);

ISAGA OO AQQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowlaadeed (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis. Wuxuu soo saaraya;

### X E E R

Waxaa dhul Dowlaadeed la siiyay, gacantana loo geliyay, (Concessio-ne e conseguente libera disponibilità) loona aqoosaday Dr. Moxamuud Moxamed Cisman, dhul ku fadhiya mq. 312, kuna yaal Muqdisho, Jidka Moxamuud Harbi.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud  
*Inj. Maxamed Xaaji Xawaadle*

### WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 3.*

*Muqdisho, 21 Jenayo 1975.*

*Hantidhawraha Guud:*

G. Dhexe CABDULLAHI WARSAME NUUR

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 8 Jenayo 1975, L. 22.

Dhul Dowladdeed loona gacan geliyay (Libera Disponibilità) Jaalle Cisman Cumar Ibrahim.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqadoo Koowad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxday 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 41 soona baxay 13-9-1973;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jenayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed 1.50 ee Reb. taarikhdu markay ahayd 21 Abrile 1974 laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. L. 6 ee 1 Jenayo 1974, taas oo lagu siiyey Jaalle Cismaan Cumar Ibrahim cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mdh. 400 kuna yaal Xamar Xaafadda Xamar Jeb-Jeb;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) dagga-naashada guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Xamar Jeb-Jeb laguna sii-yay xaashida lamb. 4237 ee 14 Oktoobar 1974 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Xaqijintii farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 14-12-1974 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar 1.9946 4 Sett. 1972 laguna haqiqiyay sida ay naq-shaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Libera Disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis. Wuxuu soo saaraya;

X E E R

In loo aqoonsan yahay Jaalle Cismaan Cumar Ibrahim milkiyada dhulka Dowladeed oo ku fadhiya mq. 400, ku yaal Muqdisho, Xafadda Xamar Jeb-Jeb.

Muqdisho, 8 Jenayo 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlah Guud

*Inj. Maxamed Xaeji Xawaadle*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 2.*

*Muqdisho, 14 Jenayo 1975.*

*Hantidhawraha Guud:*

*G. Dhege CABDULLAHI WARSAME NUUR*

## BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYNI, ISGAARSHN, OGEYSHS, IYO WIXII LA MID AH  
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Faarax Faahiye Faarax.

Markaan arkay Qod. 69 D. L. 1969 N. 2.

Waxaa cad dhumista Jeegga wareegta L. 13465, kuna qorantahay Sh. So. 1.000 (kun) shilin ee ee Bankiga Keydsiga iyo amaahda, waxaan idiinta amreeyna in loo cusooneysiyo mar labaad Jeegga, aan kor ku sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga (B. U.) haddaan la helin cid sheegta waana in gacanta laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay ama qof sita wakaalad sharci ah ayadoo la suaayso 15 beri.

Muqdisho, 25 Jenayo 1975.

Guddoomiha Maxk. Gobolka  
Dr. Yasiin Shire Faarax

(13)

## BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

Xeer Lambar 67 ee 16-10-1975.

Heerka sarrifka lacagaha qalaad.

## TALIYAH BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKUU ARKAY Qodobka 10aad, Xeerka Lr. 12 ee 26kii Sebteenbar, 1964, laguna beddelay Sharciiga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar 1964, kuna saabsan Xeerkta u detgsan Daadihinta Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, inuu caddeeyo marwalba qiimaha beddelan karo lacagteenna.

SAAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciisigii ka taagnaa lacagaha adduunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaar ka mid ah wad-damada ku jira Hayadda Lacagaha Addunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 173 ee 16-1-75, sida Sharciiga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo.

### WUXUU GUDDOONSHAY

In heerka sarifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos muuqata, laga bilaabo 16-1-75, waxaan go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqaraadiga Soomaaliya.

| Lacagta Qalaad | Heerka libsashada<br>oo Sh. So. ah | Heerka Gadidda<br>oo Sh. So. ah |
|----------------|------------------------------------|---------------------------------|
| US \$ 1.00     | 6.2327                             | 6.3573                          |
| UK £ 1.00      | 14.6223                            | 14.9147                         |
| DM. 1.00       | 2.6207                             | 2.6731                          |
| Lit. 104.13    | 1.0000                             | —                               |
| Lit. 102.05    | —                                  | 1.0000                          |
| F. Fr. 1.00    | 1.4146                             | 1.4429                          |
| Sw. Fr. 1.00   | 2.4345                             | 2.4832                          |
| Dj. Fr. 1.00   | 0.03525                            | 0.03596                         |

Muqdisho, 16-1-1975.

CUMAR AXMED CUMAR  
*Taliyaha*  
(14)

BOLIMOG Shirkad Saahmi ah

Hantideedu tahay Sh. So. 1.500.000 — Muqdisho

Ka soo Guurinta xisaabaadka Faa'iidaha iyo Khasaaraha ku tacalluqsan  
Sannadka 1973-1974 — 30ka Juuniyo 1974

| Xisaabaha               | Lihid      | Laga lihid |
|-------------------------|------------|------------|
| Lihidda                 | 522.794,84 |            |
| Makhasiirta             |            | 917.810,59 |
| Khassaradda ee sannadka | 395.015,75 |            |
|                         |            | 917.810,59 |
|                         |            | 917.810,59 |

Muqdisho, 20 Jenayo 1975.

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka  
*Maxamed Cawaale Liibaan*  
(15)

BOLIMOG S. p. A.

Capitale Sh. So. 1.500.000 — Mogadiscio

ESTRATTO DEL CONTO PROFITTI E PERDITE

Esercizio 1973-1974 — 30 Giugno 1974

| <i>Conti</i>        | <i>Attivo</i> | <i>Passivo</i> |
|---------------------|---------------|----------------|
| Attivo              | 522.794,84    |                |
| Spese               |               | 917.810,59     |
| Perdita d'Esercizio | 395.015,75    |                |
|                     | 917.810,50    | 917.810,50     |

Mogadiscio, 20 Gennaio 1975.

(15)

IL PRESIDENTE  
*Mohamed Awale Liban*

WAQAALADDA MARMARKT IWM. — I.S.M.A. - S.p.A.

OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinaya dadkii ka mid ah Warshadda Marmarka IWM. (I.S.M.A. - S.p.A.) in uu jiro fadhi caadi ah oo lagu dhigayo sal-dhigga Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (I.C.S. - S.p.A.) ee Muqdisho, maalinta bishu ay tahay 13-3-1975 saacaddu markay tahay 4.30 galabnimo, hadduu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maarsa maalinta ay tahay 29-3-1975 isku saacadda kor ku qoran.

Shirkaa assaga ah waxaa laga hadli doonaa arrimaha hoos ku taalla:

- 1) Magacaw xubin Guddiga Maamulka oo beddelaya xubin Guddiga maamulka ka mid ah oo ka baxay.
- 2) Wixii kale oo soo raaca.

Muqdisho, 20 Jenayo 1975.

(16)

MAAMULAHA GUDDIGA

**MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR**

Waxaa arkay dacwadan:

Markay arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Gancsiga Soomaalida, waxaan ogaaday iney tahay shaqadeeyda.

Arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65, n. 2;

Waxaan cadeynaya dhumiidii bugga lacagta (Ammortamento libretto) n. 6003-4, Shs. 15.100.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga niinga la yiraahdo Xaaji Cumar Maxamed Axmed, muddo 30 beri ah oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo B. U., haddaan qof kale oo ku sheeganayaas usan jirin.

Waxaan kale oo idiinka codaaneynaa in Buugga gacanta laga saaro, ninka magaciisa kor qoran yahay, ama qof kale oo ka sita Wakaale shaki aan laheyn.

Muqdisho, 1-2-1975.

**GUDDOOMIYAH A MAXKAMADDA**

(17)

*Jaalle Yasiin Shire Faarax*